## SUURAT AL-GHAASHIYAH:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *Ma ku soo gaadhay Qiyaamada warkeedii*
2. *Wajiyaal Maalintaas way dullaysnaan*
3. *Waxayna qaban shaqo dhib ah*
4. *Waxayna gali Naar kulul*
5. *Waxaana laga waraabin il kulayl daran*
6. *Wax cunto ahna kama helaan oon ahayn cunno xun ( oo wax dhibta )*
7. *Taasoon waxna cayilinhaynin gaajana wax ka taraynin*
8. *Wajiyaalna maalintaas way nicmaysnaan ( waa mu'miniinta )*
9. *Waxayna ka raalli noqotay camalkeedii*
10. *Janno sarana way gali*
11. *Kumana maqasho Jannada hadal macna darro*
12. *Waxaana ah dhexdeeda il socota*
13. *iyo Sariiro la koryeelay*
14. *iyo koobab la hor dhigay ( ehlu Jannaha )*
15. *iyo Barkimooyin la safay*
16. *iyo gogol la fidiyay*

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***
Qiyaamada iyo sida dadku u qaybsami laba waddana u kala qaadi, iyo Jannada

iyo wanaaggeeda, iyo Naarta iyo xumaanteeda, wax badan buu Quraanka ka hadlay, waxaase loo baahanyahay uun in loo darbado, wanaaggana la falo, xumaantana laga tago.
Rasuulkii Eebana wuxuu yidhi “ Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee: War ma jiraa ruux u tafa xaydan jannada, jannadu khatar ma lehee, Eebaha kacbadaan ku dhaartaye waa nuur ifi, odgoon gilgilan, sar la qurxiyey, wabi socda, midho bisil, haweenney wanaagsan oo quruxan, labbis badan, iyo nagaadi waligeed ah oo daar Nabad-Gashay, iyo faakihad iyo khudaar iyo farax iyo nicmo, meel sare oo quruxsan. Markaasay dheheen: haa, Rasuulkii Eebow annagaa u tafa xaydan. Markaasu yidhi: Dhaha: Hadduu Eebe Doono. Markaasay qoomkii dheheen: Hadduu Eebe doono.

Waxaa wariyay Ibnu Maajah

***17. Miyayna fiirinaynin sida Geela loo abuuray***

***18. Iyo sida Samada loo koryeelay***

***19. Iyo sida Buuraha loo taagay***

***20. Iyo sida dhulka loo fidiyay***

***21. Ee waani dadka waxaad tahay waaniyee ( Nabiyow )***

***22. Mana tihid mid xoog ku leh ( qasab )***

***23. Hase yeeshee ruuxii xaqa ka jeedsada oo gaalooba ( ku soo celi xaqa )***

***24. Eebana wuu caddibi caddibaada u wayn***

***25. Xagganagayna u soo noqon ( khalqigu )***

***26. Annagaana xisaabin***

Qur’an 88: 1-26

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***
Waa in la fiiriyaa khalqiga Eebe laguna waana qaataa, sida cirka, dhulka,

buuraha, geela, makhluuqaadka kalaba, Diinta Islaamkuna ma ahan qasab ee waa uun waano, hase yeeshee ruuxii xadgudba oo fasahaad la socda waa la qaban, isagooy u dambayso tii aakhirana, hadalla wuxuu ku dhanyahay in Eebe loo noqon uuna xisaabin.
Waxaa laga wariyay Abuu Umaame inuu maray Khaalid Bini Yaziid Binu Macaawiye, markaasuu waydiiyay kalimadii ugu jilicsanayd ees ka maqlay Rasuulkii Eebe “ Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee, wuxuuna yidhi: waxaan Rasuulkii Eebe “ Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee, maqlay isagoo leh: Dhammaantiin Jannadaad galaysaan ruux Eebe ka carara mooyee sida neef geela ehelkiisa uga cararo.

Waxaa wariyay Imaamu Axmad